




Sida saxda ah ee loo tuuro batariyada iyo elektirooningga

Laga bilaabo Janaayo 1, 2024, Seattle waxay ku dhawaaqday [sharci cusub](#) oo ah in dadka deegaanka aan loo ogolayn inay ku tuuraan batariyada iyo elektirooningga qashinka.

Batariyada iyo elektirooningga waxay u baahan yihiin maarayn gaar ah iyo tuurid badbaado leh. Waxa kale oo laga yaabaa inay ku jiraan walxo dib loo warshadayn karo.



Mamnuuciddu waxay khusaysaa batariyada iyo elektarooningga iyo sidoo kale alaabooyinka leh batariyada sida qalabyada yaryar, alaabta carruurtu ku ciyaarto, kombayuutarrada, shaashadaha, iyo baaskiillada elektarooningga ah.

Sida saxda ah ee loogu tuuro batariyada iyo elektirooningga gudaha Seattle

Ikhtiyaarada Tuurida Batteriga:

- Soo dhigid bilaash ah ee [xarumaha Wareejinta](#): North Transfer Station (1350 North 34th Street) iyo South Transfer Station (130 South Kenyon Street)
- Dhigista bilaashka ah ee [Xarunta Qashinka Khatarta ah ee Qoyska](#): Xarunta Qashinka Khatarta ah ee Waqooyiga (12550 Stone Avenue North) iyo Xarunta Qashinka Khatarta ah ee Koonfurta (8100 2nd Ave S)
- Meel kasta oo ku qoran [Call2Recycle.org](#) ama [goobaha E-cycle WA](#)
- Deganayaashu waxay sidoo kale ballan ku qabsan karaan shay gaar ah oo guriga lagaga soo qaadayo lacag: \$5 batariyada, \$20 sanduuqa alaabta gaarka ah (batariyada, qalabka yar yar, iwm.) ama \$30 loogu talagalay elektarooningga waaweyn (TV-yada ka weyn 2 ft.)

Haddii batarigu waxyeeloobo ama xumaado, macaamiishu waa in ay ku tuuraan Xarunta [Maareynta Qashinka Khatarta ah ee Qoyska](#) (lacag la'aan)

Doorashooyinka Tuurida Elektarooniga

- Dhigis bilaash ah: Saldhigga Wareejinta Waqooyi (1350 North 24th Street) ama [E-cycle WA](#) goobaha
- Guriga: Codso [Soo Qaadista Shayga Gaarka ah](#) (\$20 ee sanduuqa Alaabta Gaarka ah, \$30 TV-yada ka weyn 2 ft.)

Waa maxay sababta looga mamnuucay batariyada iyo elektirooningga qashinka?

- Batariyada iyo elektirooningga waxay noqon karaan khatar waxayna sababi karaan dab. Batariyadu waa sababta ugu badan ee dabku ka kaco xarumahayaga Wareejinta.

- Batariyadu waxay daadin karaan aashitada iyo biraha marka lagu qabto qulqulka qashinka oo waxyeelo u geystaan deegaanka.

Caawintaadu waxay Seattle ka dhigaysaa hormuudka maaraynta qashinka, falkaaguna wuxuu caawiyaa ilaalinta deegaanka.